



Telefoonada mobeylka Hongkong laga soo diray, mashiino Kanada ka yimid, waraaqo Swiiden ka timid, mashiinadii warshadda China loo dira'yo ama dhagaxa marmar Talyaani oo India loo dira'yo-intaa qeyb yar un a'yay ka tahay badnaanta alaabta maalin walba caalimka oo dhan la kala iibsana'yo iyo la kala dira'yo. Saadka aduunka waa meel kasta kuna saabsan tahay sharkaad kasta nooc ee doonto ha ahaato. Hawshaa waxa maamula'yo shaqaalaha sekreteriga ganacsiga ee adeega saadka iyo alaab rarida.

Sekreteriga/sekreteriyadda ganacsiga ee alaab rarida iyo adeega saadka
Kaufmann/Kauffrau für Spedition und Logistikdienstleistung

Maclumaadka shaqadaa:

Wey kala duwan yihiin alaabta caalimka ee lagu kala dira'yo dariiqyada, bada ama cirka. Qalabka kombyuutarka ama mashiin weyn warshad ka mid ah. Shaqaalaha ganacsiga alaab rarida iyo adeega saadka waa muhiim waayo isaga ka masuul ah inay hawsha saadka si fiican u socoto oo khalado soo gelin. Waxaanuu ka shaqee'yaa 500 ee sharkadaha alaab rarid iyo kala diridda ka jiraan Hamburg.

Tobabarka 3 sano ah waxa lagu barana'yaa qeybo gaar ah iyo guud ahaan hawshoo dhan la isku soo wada koobay. Ujeedada waa tobabare la gaadhsiiin rabo waxoo dhan inuu si fiican u bartay iyo garana'yo. Shaqada hawsheeda waa: macmiishii oo loo taliina'yo, la siina'yo maclumaadka waxay dallban karaan. Heshiis la sii diyaarin iyo la qori karo iyo marka dambe heshiiska la kala saxeeexo, la garto qanuunka caadooyinka, shaqada la sii qorsheeyn karo iyo markay shaqada socoto la sii hagaaji'yo iyo haday mushkulad jirto la xali'yo iyo haday alaabtii gaadiidka saarnaa jabaan xal loo helol.

Waxa jirto tobabar badan dheerad ah oo farsamo iyo xirfado kale la baran iyo lagu sii dalici karo ama xitaa jaamacadda oo deraja sare lagu gaadha'yo. Xirfadda la gaadhi karo waa bilaa xad.

Shuruudaha:

Hadii la rabo in la codsado shaqo tobabareed oo lagu noqona'yo sekreteriga ganacsiga ee adeega saadka iyo alaab rarida.wa in ugu yaraan dugsiga dhexe sii fiican lagu qalin jebiyay ama dugsiga sare laga soo baxay.

Sharkadaha waxay raadina'yaan codsade'yaal fekeradood shaqada ku soo daro, koox la shaqayn karo iyo shaqada ku dadaalan, dadka dhakhso la qabsan karaan, dhakhso dhibatooyin xalin karaan, keligood shaqada maamuli karaan, masuul qaadi karaan, luqado shisheeye sida Af-Ingriisi iyo luqqado kale hadii la yaqaano wey fiican tahay. Waxa codsade laga doona'yaa inuu dadka wadan kale ka yimid si ixtaam leh ula macaamilo waayo shaqadan macmiisha marmar badan waa shisheeye.

Mushaharka:

Tababare'yaasha sanadaha la tobabara'yo waxay hela'yaan mushahar kolba loo dalaca'yo. Sanadka ugu horee'yo tobabara'yaasha waxay helaan qiyaas ahaan 700 – 725 €. Laakiin sharkadaha wey kala duwan yihiin, waxayna ku saabsan tahay heshiisyada jiro.

Maclumaadka shaqadaa ma danaynaysaa? Waxa codsad loo dira karaa 500 ee sharkadaha socdaalka oo ka jiraan Hamburg iyo agagaarkeeda! Maclumaad kale waxaad ka helayaas www.logistik-lernen.hamburg.